



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Endowments and Religious Affairs
Office of the Director General

REF: WAAD /XAG /K4:1/75/ 2016

Date: 30/03 /2016

Ku: Dhammaan Umadda Soomaaliyeed meel walba ay kala joogaan

Ujeeddo: Baaq Roob Doon iyo Alla Bari ah

Wasaarada Awqaafta iyo Arrimaha Diinta Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayadoo ka anbaqaadeysa xaaladda abaaraha ay ku suganyihii dadka Soomaaliyeed maanta, waxey Wasaaraddu isugu yeertay Culumaa'udiin, Ganacsato iyo qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed maanta oo ah 30/03/2014, kuna beegan 20/6/1437 Hijriyada , si wada tashi looga sameeyo sidii looga gudbi lahaa abaarahan.

Fikrado isdhaafsi iyo doodo kadib, Waxaa la isku raacay in ay lagama maarmaan tahay in la sameeyo Roob Doon iyo Alla Bari, dadkana iskaalmeeyaan, Waaana shirka kasoo baxay Warmurtiyeedka Baaqan:

1. In ilahay loo noqdo oo loo toobad keeno si dhab ah.
2. In hantida lakala dhacay iyo kuwa lakala haysto la isu celiyo.
3. In dhammaan Soomaalidu is cafiso.
4. In dhammaan Umadda Soomaaliyeed ee Muslimka ah ay Soomaan afar maalmood oo xiriir ah, oo ka billaabaneysa (Jumco 01/04/2016 Illaa Isniin 04/04/2016, oo ku beegan Hijriyada 22/6/1437-25/6/1437).
5. In maalinta Isniinta ah oo ku beegan 04/04/2016 (25/6/1437 Hijriyada) ayadoo la Soomanyahay dadku isugu soo baxaan Masaajidda, iyo Fagaarayaasha, Salaad Roob Doon ahna la tukado.
6. In salaadaha Faradka marka latukanayo la Qunuudo, mudadaas afarta maalmood ah.
7. Dhammaan Gobollada Dalka iyo Dibadaba in laga oogo Salaadaha Roob Doonka ah.
8. In la badiyo Istiqfaarta iyo Alle bariga, si nalooga kor qaado dhibaatooyinka iyo abaaraha.
9. Waxaa loogu baaqayaa dhammaan Umadda Soomaaliyeed dal iyo dibadba in ay iskaalmeeyaan, isna gacan qabtaan.
10. In dhammaan Wasaaradaha Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Maamul Goboleedyada Dalka ka jira ay faraan dadka fulinta Baaqan.

Mahadsanidiin,,

Cumar Faaruq Sh. Cabdicasiis Cusmaan
Agaasimaha Guud ee Wasaaradda

